

VINTERLJUS 19

Ku soo dhawow Iftiinka jiilaalka 2019! Jimce 13-ka diisambar waxaa la furayaa Iftiinka jiilaalka. Furitaankan wuxuu ka dhacayaa Stora torget kuna taala Linköping saacadu markay tahay 18.00. Dadka oo dhan waa lagu soo dhawaynayaa inay ka qayb-qataan!

Iftiinka jiilaalka wuxuu ka koobanyahay 14 goobood oo iftiin lagu rakibay, waxaa soo diyaariyay farshaxano iyo abuurayaal. Rakibaadyahan waxay ku yaalaan aaga ku hareersan Stora torget, kaniisada domkyrkan iyo qasriga. Farshaxanadan iyo abuurayaashan waxay ka kala yimaadeen dalal kala duwan oo waxay ku saleeyeen mawduuca ah "dhaq-dhaqaaq" markay abuurayeen shaqadan. Natiijadan waxay noqotay noocyo kala duwan oo ah rakibaadyo iftiin leh dhanka cabirka iyo farsamada labadaba.

Munaasabad bilaash ah

Munaasabadan waxay soconaysaa 13ka ilaa 26-ka diisambar. Rakibaadyadan way daaranyihiin galab kastaba inta u dhaxaysa 17.00 iyo 22.00 (jimcayaasha iyo sabsiyada ilaa 24.00), markaa soo kaxayso saaxiibadaa iyo qoyskaaga oo kaalaya oo daawada wakhtiga idiin haboon.

Furitaanka iyo inta kale ee munaasabadani labaduba waa bilaash.

Iftiinka jiilaalka ee sanadkan waa furitaan cusub ka dib hakad ahaa saddex sano. Ujeedadu waa in gudaha magaalada laga dhigo mid soo jiidasho leh iyo in la abuur xasilooni si aagagan iyo goobahan loo siiyo iftiin dheeraad ah. Iftiinku wuxuu xitaa abuuraa goobo lagu kulmo. Soo habayntan waxaa samaysay degmaa Linköping oo wada-shaqayn la samaysay Tekniska verken iyo Visit Linköping & Co.

Ma doonaysaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato?

Si loo helo warbixin dheeraad ah iyo si loo isticmaalo khariidadayada kombiyuutarka, booqo bogga intarnatka:

www.vinterljuslinkoping.se

Xitaa munaasabadan kala soco Facebook: Vinterljus Linköping

Haddii aad su'aalo hayso, la xiriir qaybta xiriirka ee Linköping iyadoo loo marayo ii-mayl ama telafoonka:

kontakt@linkoping.se

013-20 60 00



Linköping
Där idéer blir verklighet